

SOMALI

TUSLA

An Ghníomhaireacht um
Leanaí agus an Teaghlach
Child and Family Agency

Hagaha kooban ee Tusla:
**Loogu talagalay
qoysaska dhowaan
yimi Ireland**



www.tusla.ie


CYPSC
CHILDREN & YOUNG PEOPLE'S SERVICES COMMITTEES

Tusmada

Hordhac	3
Waa maxay Xuquuqda Carruuta ee Ireland	4
Masuuliyadaha Waalidka iyo Dadka Carruurta ka Masuulka ah	4
Kormeerka Carruurta	4
Adeegyada Taageerada Qoyska	5
Ilaalinta iyo Fayoqabka Ilmaha	6
Maxay tahay inaad sameyso haddii aad la kulanto walaac ku saabsan ilmo	6
Sidee baan ku soo gudbiyaa walaac ku saabsan ilmo?	6
Nidaamka Daryeelka Ilmaha ee Ireland	8
Nidaamka Waxbarashada ee Ireland	9
Dugsi Isqoris	9
Macluumaadka kale ee waxtarka yeelan kara	10
Da'da Ogolaanshaha Galmo	10
Waa maxay da'da dadku ku guuursan karaan Ireland?	10
Da'da Sharciga ah ee Shaqada	10
Xuquuqda Aqoonsiga Jinsi	10
Khamrada iyo Sharciga	10
Adeegyada Hoyaadka Dadka Haysta Ilaalinta Caalamiga ah (IPAS)	10
Rabshadaha Qoyska iyo Xadgudubka Jinsiga Ku Dhisan	11
Liiska Ururada la shaqeeya dadka ku cusub Ireland	12
Xiriirada kale ee Waxtarka leh	13

Hordhac

Hagahan waxa diyaariyay Hay'adda Ilmaha iyo Qoyska (Tusla), iyadoo xog iyo talo ka helaya qoysaska dhowaan yimi Ireland, oo tani waa daabacad dib loo naqtiimay oo dib u daabicista (2023) waxa maalgeliyay hindisaha Guddidada Adeegyada Carruurta iyo Dhalinyarada (CYPSC)

Dukumeentigan waxa ku jira hagitaan toos ah oo aanu rajaynayno inuu kaa caawin doono jiheynta sannadaha hore ee noloshada Ireland, laga soo bilaabo daryeelka ilmaha ee dugsiga ka hor iyo nidaamyada dugsiga, illaa kormeerka ilmaha iyo adeegyada taageerada qoysaska. Waxa aanu sidoo kale dukumeentigan ku soo darnay qaybo kale kuwaas oo aanu filayno inay ku caawin doonaan.



Waa maxay Xuquuqda Carruurta ee Ireland

Xuquuqda carruurta waxa ka mid ah xuquuqda caafimaadka, waxbarashada, nolol qoys, ciyaarta iyo madadaalada, iyo heer nololeed ku filan iyo in laga ilaaliyo tacaddi iyo dhibaato nooc kasta oo ay tahay. Xuquuqda carruurta waxay koobsataa sannadaha hore ee ka soo bilaabma dhalashada ilmaha, illaa iyo inta ilmuhu qof weyn noqonayo taas oo ah markuu gaaro da'da 18-sannadood-jir - haddii aanay sifo sharci ah ku guursan.

Masuuliyadaha Waalidka iyo Dadka Carruurta ka Masuulka ah

Ireland, waalidiinta iyo barbaariyaasha ayaa leh masuuliyadda koobaad ee ilmaha iyo ilaalinta carruurtooda. Mararka qaarkood, sababo kala duwan darteed, waxa dhici karta in waalidiintu ay awoodi waayaan inay ilmahooda siiyaan daryeel iyo ilaalin, mararka qaarna waxa loo baahan karaa taageero xooggan si carruurta looga ilaaliyo wixii dhibaato ah. Xaaladahan oo kale markay dhacaan waxa laga yaabaa in Dowladda Ireland soo farageliso iyada oo u dan leh inay sii xoojiso awoodda qoyseed ee horey u jirtay. Hay'ado dowladeed kala duwan ayaa qoysaska siiya kaalmo ay kaga guuleystaan dhibaatooyinka oo ku hubiyaan in ilmuhu u badqabaan.

Ireland marka la joogo, waa muhiim inaad ka warqabto lama ogola in ilmaha qofwayni dhirbaaxo ama wax ku dhufto ha joogo guriga ama dugsigee. Ireland marka la joogo, dhammaan noocyada ciqaabaha ee ilmaha lagula kaco waa sharci darro. Tan waxa loola macaamili karaa dambi oo waxa loo gudbin karaa Booliska Ireland (An Garda Síochána).

Kormeerka Carruurta

Waalidiinta iyo dadka ilmaha ka masuulka ah waqti ayay carruutooda ka maqnaadaan, ha noqoto muddo dheer markay shaqada aadaan ama muddo gaaban oo ay hawlo bulsha uga tagaan ilmaha. Carruurta waa in aan marnaba keligood laga tegin, sidaas darteed waalidiintu waa inay ilmahooda kaga tagaan asxaabta ay aaminsan yihiin ama adeegyada daryeelka ama sii haynta ilmaha.

Ma jirto da' go'an oo lagu garto markay sharci tahay in ilmaha keligii guriga lagaga tago, maadaama taasi ku xiran tahay in ilmuhu gaaray heer qaangaarnimo keligii laga tegi karo. Ireland marka la joogo, carruurta ka yar da'da 14 sannadood looma aqoonsana inay gaareen heer qaangaarnimo keligooda laga tegi karo iyada oo aan la korjoogteynayn. Da'yarta intaas ka weyn, go'aanka waxa leh waalidka ama barbaariyaha, iyadoo lagu saleynayo ilmaha, heerkooda qaangaarnimo iyo xaaladooda nololeed.

Carruurta waxay ku qaangaaraan da' kala duwan, laakiin hoos waxa ku qorani waa tilmaan qiyaas ah oo ku saabsan marka carruurta keligood guriga lagaga tegi karo:

Nuunahayga keligii guriga ma kaga tegi karaa?

Maya, xitaa daqiiqado yar keligii kama tegi kartid.

Ilmahayga yar keligii guriga ma kaga tegi karaa?

Carruurta yaryar marnaba keligood guriga lagagama tegi karo, xitaa muddo kooban.

Ilmahayga waxooga roon ma kaga tegi karaa guriga?

Waxa lagu taliyaa in carruurta ka yar da'da 14 sannadood aan guriga keligood lagaga tegin wax ka badan muddo aad u yar.

Ilmahayga da' yarta ah guriga keligii ma kaga tegi karaa?

Da' yarta ka weyn da'da 16 guriga waa lagaga tegi karaa keligood.

Waa maxay da'da laga rabo inuu jiro qofka ilmaha haynaya?

Haddii aad u baahato inaad adeegsato qof ilmaha kuu sii haya, waa inaad had iyo jeer hubisaa inay ka weyn yihiin 16 sannadood jir, waana inaad ka dalbataa laba tixraac si aad u hubiso inay leeyihiin masuuliyad lagaga tegi karo carruurtaada. *(Xirmada Dhammaan Macluumaadka Globe AIPIP, 2010)*

Haddii ilmo keligii laga tago oo aan la korjoogteyn, khaastan iyadoo koox la yahay, oo ay wax walaacyo ahi ka dhashaan tan, markaas oo kale Shaqaalaha Arrimaha Bulshada ee Tusla ayaa laga yaabaa inay soo farageliyaan si ay wax uga qabtaan walaacyadan oo ay u taageeraan qoyska.

Adeegyada Taageerada Qoyska

Nolosha qoysku had iyo jeer maaha mid sahlan, khaasatan marka lagu jiro waqtiyada adag ee kala wareega.

Adeegyada Taageerada Qoyska ee Tusla ayaa caawimo bixin kara. Inaad hesho qof aad kala hadasho dhibaatooyinka ayaa xitaa noqon karta habka ugu fudud ee wax ka qabashadooda lagu bilaabo. Waxa jira kooxo taageero oo badan oo loogu talagalay dadka waaweyn, dhalinyarada yaryar, carruurta, iyo daryeelayaasha kuwaas oo dadka siiya fursad ay ku sheegaan sheekooyinkooda oo midba ka kale ku taageero. Adeegyada Taageerada Qoyska waxa qoysaska guud ahaan lagu siiyaan guryahooda iyo bulshadooda dhexdeeda.

Xaaladaadu nooc kasta ha ahaatee, Tusla waxay ku siinaysaa adeegyo kala duwan oo talo iyo taageero siiya qoysaska. Kuwan waxa ka mid ah shaqaalaha taageerada qoyska, shaqaalaha arrimaha bulshada, shaqaalaha dhalinyarada, Xarumaha Keydka Qoyska, kooxo taageereed iyo adeegyo la talineed. Adeegyadan waxa laga dhex heli karaa Xarumaha Keydka Qoyska iyo Shebekadaha Taageerada Ilmaha iyo Qoyska. Adeegyada noocan ah waxay qoysaska ka caawin karaan inay ka gudbaan dhibaatooyinka adag, waxay hubiyaan in carruurta helaan deegaan deggan oo ay ku noolaadaan, oo waxay taageero siiyaan waalidiinta arrimuhu ku adkaadaan.

Xarumaha Keydka Qoyska waxay dhextaal u yihiin bulshooyin badan waana il muhiim ah oo macluumaad, talo, iyo taageero laga helo. Waxay sidoo kale bixiyaan barnaamijyo taageero qoys iyo barbaarineed kala duwan:

<https://www.familyresource.ie/>

Xiriirada Taageerada Qoyska

Shebekadaha Taageerada Ilmaha iyo Qoyska	https://www.tusla.ie/familysupport/
Taageerooyinka Barbaarinta	https://www.tusla.ie/parenting-24-seven/
Kooxaha Maxalliga ee Shaqada Arrimaha Bulshada	https://www.tusla.ie/get-in-touch/duty-social-work-teams/
Guddiyada Adeegyada Carruurta iyo Da' Yarta (CYPSC)	https://www.cypsc.ie/contact.36.html
Bogga Websaydka Dowladda Ireland ee Taageerada Barbaarinta Ilmaha	https://www.gov.ie/en/publication/91ea0-support-and-advice/#local-supports-for-parents

Ilaalinta iyo Fayoqabka Ilmaha

Hay'adda Ilmaha iyo Qoyska (Tusla) ayaa ka masuul ah badbaadada iyo fayoqabka carruurta Ireland joogta. Booliska Ireland (An Garda Síochána) ayaa sidoo kale si waafaqsan sharciga Ireland leh masuuliyadda badbaadada iyo fayoqabka carruurta.

Qof kasta oo Ireland ku nool waxa masuuliyadi ka saaran inay soo sheegaan haddii ay la kulmaan carruur laga yaabo inay wajahayaan tacaddi iyo dayacaad.

Maxay tahay inaad sameyso haddii aad la kulanto walaac ku saabsan ilmo

Ireland, qof kasta waajib sharci ah ayaa ka saaran soo gudbinta walaacyada ku saabsan ilmaha. Waa in Tusla lagu soo wargeliyo had iyo jeer haddii aad hayso sababo macquul ah oo aad uga walaacsan tahay in ilme la dayacay ama lagu tacaddiyay ama uu khatar ugu jiro dayacaad iyo tacaddi. Tan waxa ka mid ah haddii aad la kulanto wax shaki leh ku aragto koox ilmo ku jiro ama xarrun hoayaad.

Haddii aad ka walaacsan tahay fayoqabka iyo badbaadada ilmo, waa inaad la soo xiriirta Kooxaha Shaqada Arrimaha Bulsho ee Tusla/Meelaha Soo Gudbinta ee loo Gaaryeelay adiga oo aan wax dibu dhac ah sameyn:

<https://www.tusla.ie/get-in-touch/duty-social-work-teams/>

Sidee baan ku soo gudbiyaa walaac ku saabsan ilmo?

Walaacaaga waxaad u soo gudbin kartaa adigoo toos u imanaya xarumaha, taleefan soo diraya ama waraaq u qoraya shaqaalaha adeegyada arrimaha bulshada ee ka jira aagga ilmuhi ku nool yahay.

Halkan ayaaad ka helayaa tafaasiisha xiriirka ee kooxaha arrimaha bulshada ka shaqeeya ee Tusla:

<https://www.tusla.ie/children-first/contact-a-social-worker3/>

Walaacyada badqabka iyo ilaalinta ilmaha waxa ka mid ah:

- Caddeyn dhaawac ama dabeecad lagu garan karo inay ka dhalatay tacaddi oo aanay suurtoagal ahayn inay ka dhalatay wax kale
- Walaac kasta oo ku saabsan tacaddi galmoo oo dhici kara
- Calaamo muujinaya in ilmuhu la kulmay dayacaad maskaxeed iyo jireed
- Ilmo leh ama si kale u muujinaya in lagu tacaddiyay oo la dhibaateeyay
- In qof weyn ama ilme qirto ama muujiyo tacaddi ay ku kaceen
- Markhaati uu soo sheegay arkay iyadoo ilmaha lagu tacaddiyayo

Wixii waydiin ama walaacyo ah ee la xiriiira carruurta waxa saacadaha shaqada ka baxsan si degdeg ah loogu soo gudbinayaa An Garda Síochána (Booliska Ireland):

<https://www.garda.ie/en/contact-us/>



Nidaamka Daryeelka Ilmaha ee Ireland

Xannaanada Carruurta ee Dugsiga ka hor

Ireland, guud ahaan, carruurta ka yar 6 sannadood jir waxay helaan nooc waxbarasho dhallaanimo. Waxa jira laba nidaam oo waalidiinta tan ka caawiya:

1. **Barnaamijka Waxbarashada Dhallaanimiada Hore (ECCE)**
2. **Nidaamka Xannaaneynta Carruurta ee Waddanka (NCS)**

ECCE - Barnaamijka Xannaanada Dugsiga ka hore Bilaashka ah

Barnaamijka ECCE waa barnaamij xannaano dugsiga ka hor ah oo ay heli karaan dhammaan carruurta muddo laba sannadood ah ka hor intaanay bilaabin dugsiga hoose. Wuxu barnaamijkani socdaa laga bilaabo Sibteembar illaa Juun saddex saacadood maalintii shan beri todobaadkiiba.

Carruurta waxay barnaamijkan ku habboon yihiin laga bilaabo Sibteembar ka dib markay noqdaan 2 sannadood iyo 8 bilood jir. Barnaamijkani wuxu dhammaadaa 5 sannadood iyo 6 bilood jir. Wixii su'aalo ah ee la xiriira nidaamka ECCE fadlan la xiriir: eyqueries@dcya.ie

Nidaamka Xannaaneynta Carruurta ee Waddanka

Nidaamka Xannaaneynta Carruurta ee Waddanka (NCS) waa barnaamij dheeri ah oo 'ku dul-dhisan' Nidaamka ECCE. Wuxu taageero dhaqaale oo dheeri ah siiyaa kharashyada dhaqaale ee daryeelka ilmaha saacadaha ilmuhu dibadda ka jiro dugsiga xannaanada. Waxa jira saddex nooc oo Gudbino ah oo barnaamijkan lagu soo geli karo:

1. **Caalami,**
2. **Dakhli Qiimeyn** iyo
3. **Gudbino la-kafaalagaaday.**

Wixii macluumaada ee ku saabsan 1. Caalamiga iyo 2. Gudbinaha Dakhli Qiimeynta: Xiriiri: www.ncs.gov.ie ama **+353 1 906 8530**.

Gudbino la-kafaalagaaday: Haddii lagu siiyay Ilaalinta Kumeelgaar ah, Nidaamka Xannaaneynta Carruurta ee Waddanka (NCS) wuxu dabooli karaa kharashka buuxa ee xannaaneynta carruurta si waafaqsa nidaamka kafaalo-qaadashada ee NCS. Gudbintan Kafaalasho waa inay sameysaa hay'ad kaafalasho, kuwaas oo Tusla ay ka mid tahay.



Maxay Gudbinta Kafaalo ee Tusla iila macno tahay aniga ka waalid ahaan?

Gofka kula shaqeynaya ee ka socda Tusla ayaa buuxin doona foom gudbineed si laguugu sameeyo noocan gudbintan ah. Foomkani wuxu kuu sheegi doonaa tirada saacadaha daryeelka ilmaha ee aad isticmaali karto todobaadkii. Tirada saacadaha ugu badan ee la heli karo waa 45 todobaadkiiba. Saacadahan waxaad u isticmaali kartaa adeegyada xannaaneynta ilmaha ee Tusla ka diiwaangashan ee barnaamijka ka qaybqaadanaya. Foomka gudbintu wuxu sidoo kale kuu sheegi doona muddada gudbintu sii soconayso. Guud ahaan, waxay qaadataa hal sano.



Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Kooxda Kafaalashada NCS waxa lagala xiriiri karaa taleefanka **+353 1 906 8535** laga bilaabo 9 subaxnimo to 5 galabnimo Isniinta illaa Jimce ama iimayl loo dirayo sponsors@ncs.gov.ie

Waxaad isticmaali kartaa qaybta [Childcare Search Function](#) si aad u raadiiso liiska dhammeyska tiran ee adeegyada xannaaneynta ilmaha ee NSC ee ku jira bogga www.ncs.gov.ie



Guddiyada Xannaaneynta Ilmaha ee Magaalada/Degmada

Guddiyadani waxay sidoo kale qoysaska ku taageeraan oo kukaalmeeyaan bixiyayaasha daryeelka waxbarashada dhallaanimo. Macluumaadka waxa laga heli karaa: www.myccc.ie. Carruurta jirta da'da u dhexaysa 4 iyo 18 waxa laga taageeri doonaa helitaanka waxbarashada dugsiga hoose ama dugsiga hoose ka dib oo ay Dowladdu u bixiso hadba sidii ku habboon.

Nidaamka Waxbarashada ee Ireland

Dugsi Isqoris

Ireland, carruurta waa inay dugsi dhigtaan inta u dhexaysa da'da 6 sannadooda illaa inta ay ka gaarayaan 16 sannadood.

Sannadaha hore ee dugsi waxa la dhahaa sannadaha '**Dugsi Hoose**' Waxbarashadani waa bilaash, dhammaan carruurtana waxa laga rabaa inay dhigtaan. Ilmuhu waa inuu jiaa ugu yaraan 4 sannadood bilowga sannad dugsiyeedka si uu u bilaabo dugsi. Ireland, waalidka ama qofka ilmaha ka masuulka ahi waa inuu hubiyaa in ilmuhu tago dugsi maalintii kasta. Waalidka ama qofka ilmaha ka masuulka ah waa inuu sidoo kale dugsi ku soo wargeliyaa marka ilmuhu maqnaado iyo sababta uu u maqnaaday. Dugsi waa inuu soo wargeliyaa Adeegyada Taageerada Waxbarashada ee Tusla, haddii ilmahaagu dugsi ka maqnaa labaatan beri ama wax ka badan sannad-dugsiyeedkii ama haddii walaac laga qabo in ilmahaagu dugsi in badan ka maqan yahay. Fadlan macluumaadka soo xaadiritaanka dugsi ee carruurta halkan ka hel: https://www.tusla.ie/uploads/content/english_leaflet.pdf

Heerka xiga ee waxbarashada Ireland waxa la dhahaa '**Dugsi Sare ama Waxbarashada Dugsi Hoose ka dib**' waxana loogu talagalay ardayda jirta da'da u dhexaysa 12 illa 18 sannadood. Soo xaadirista dugsi waa u muhiim ardayda da'doodu ka yar tahay 16. Dugsiyada sare badankoodu lacag khidmad ah ardayda kama qaadaan.

Carruurta da'doodu u dhexaysao 4 iyo 18 waxa laga taageeri doonaa helitaanka waxbarashada aasaasiga ah ama waxbarashada dugsi sare ee Dowladdu bixiso. Si aad ilmahaaga waxbarashada ugu bilowdo, waxaad u tagi kartaa dugsi ku yaalla aagaaga oo waxay bixin doonaan macluumaad ku saabsan sida ilmaha dugsi loo qorayo.

Liiska dugsiyada ayaa laga heli karaa halkan:

<https://www.gov.ie/en/directory/category/495b8a-schools/>

Kooxaha Waxbarashada iyo Luuqadda ee Gobolada (REALTs) ayaa taageeri doona qoysaska raadinaya Ilaalinta Caalami ah ee carruurtoodu u baahan tahay in dugsi la qoro. Qoysaska dhibaato kala kulma helista dugsi, waxay **Kooxda REALT ee deegaankooda** kala xiriiri karaan: <https://www.gov.ie/en/publication/48639-information-for-schools-ukraine/>

Shaqaalaha adeega Taageerada Waxbarashada ee Tusla (TESS)

waa xubno muhiim ah oo ka tirsan Kooxda REALT oo waxay caawin doonaan qoysaska haddii ay dhibaato kala kulmaan inay dugsiyada boos ka helaan: <https://www.tusla.ie/tess/get-in-touch/> ama **+353 1 7718636 / +353 1 7718586**



Macluumaad kale ayaa laga yaabaa inay faa'iido lahaato

Da'da Ogolaanshaha Galmo

Ireland, sharciyan waxaad ogolaan kartaa inaad galmo sameyso 17 sannadood jir markaad gaarto. Tan dhammaan waa laga siman yahay kumana xirna waxa fikirkaaga galmo yahay ama jinsiga ama jinsiyada aad galmada la sameynayso. Macluumaad dheeraad ah oo tan ku saabsan waxa laga heli kara: <https://www.citizensinformation.ie/en/birth-family-relationships/children-s-rights-and-policy/>

Waa maxay da'da dadku ku guuursan karaan Ireland?

Da'du ku guursan karaan Ireland dhexdeeda waa 18 sannadood jir. Haddii qofku ka yaryahay da'da 18 sannadood, waa inay tagaan Maxkamad si ay u helaan "Amar Dhaafitaan" si guurka loogu ogolaado.

Da'da Shaqada ee Sharciga ah

reland, carruurta jira inta u dhexaysa 14 iyo 18 sannadood waxay mararka qaarkood heli karaa shaqo qayb ah xagaagii ama saacadaha aanay dugsiga dhiganayn. Dhaliyaraada dhiganaya kulleejka ayaa sidoo kale qabta shaqo qayb ah taas oo ay waafajiyaan waxbarashadood.

Qof da' yari ahi wuxu qaban karaa shaqo qayb ah laga soo bilaabo da'da 14 sannadood jir, shaqo buuxdana wuxu qaban karaa laga bilaabo 16 sannadood jir. Hase ahaatee, inta ay ka yaryihiin 18 sannadood jir, waxa jira xad saaran muddada qofka yari shaqaynayo iyo noocyada shaqada ee ay qaban karaan.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shaqada la qabto da'da 18 ka hooseysa, macluumaadka wuxu diyaar ku yahay www.citizensinformation.ie

Xuquuqda Aqoonsiga Jinsi

reland markaad joogto waxaad jinsigaaga kuaqoonsan kartaa da' kasta. Si jinsigaaga si sharci ah laguugu aqoonsado waa inaad ka weyn tahay da'da 18 sannadood jir. Macluumaad dheeraad ah oo tan ku saabsan waxa laga heli kara: <https://www.citizensinformation.ie/en/birth-family-relationships/legal-recognition-of-preferred-gender/>

Khamrada iyo Sharciga

aa inaad jirtaa 18 sannadood ama ka weyn tahay si aad khamri u gadato adigoo jooga Ireland. Waa sharci darro in khamro la siiyo, loo gado, ama la siiyo qof ka yar 18 sannadood jir. Ireland lama ogola in khamro lagu cabbo goobaha dadwaynaha badankooda.

Adeegyada Hoyaadka Dadka Haysta Ilaalinta Caalamiga ah (IPAS)

Haddii aad u baahan tahay in dowladdu ku siiso hoy la xiriir Miiska Kaalmada (Helpdesk) ee IPAS si lagu taageero (la heli karo 24-ka saacadoodba) ee: ipasinbox@equality.gov.ie

Wixii macluumaad guud ah:

- Golaha Qaxoontiga ee Ireland: www.irishrefugeecouncil.ie
- Macluumaadka Muwaadiniinta: <https://www.citizensinformation.ie/en/moving-country/asylum-seekers-and-refugees/>

Rabshadaha Qoyska iyo Xadgudubka Jinsiga Ku Dhisan

Xadgudubka iyo rabshadaha ka dhaca guryaha lama ogola oo waa sharci darro Ireland gudaheeda. Waxaad u gudbin kartaa **An Garda Síochána** haddii ay kugu dhacdo adiga ama qoyskaaga. Rabshadaha Qoyska waxa loola jeeda isticmaal xoog jireed, mid maskaeed ama hanjabaadda in dhibaato jireed la geysanayo, oo ay ku jiraan tacaddiyada galmo ee dhexmara dadka waaweyn ee xiriirada dhow leh.

Waxa ka mid ah rabshadaha ay ku kacaan dadka isqaba, jaalalka, wiil, gabar, ama qof kasta oo kale oo dulmaha xiriir dhow la leh ama la nool.

Si waafaqsan xeerarka rabshadaha qoysaska ee Ireland, waxa jira ilaalino la heli karo iyadoo aad soo qaadanaysa amarro badbaado ama ilaalineed (iyadoo qofka laga joojinayo inuu kuu soo dhawaado ama u soo dhawaado gurigaaga). Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan tan waxa laga heli karaa Golaha Kaalmada Sharciga ee Ireland: www.legalaidboard.ie

Khadka Adeegyada Kaalmad iyo Xaaladaha Qalalaasaha

Booliska Ireland (Garda Síochána) - 24-ka saacadood	999/112 ama isteeshinka Garda ee aagaaga https://www.garda.ie/en/
Khadka Gargaarka Dhibaatooyinka Kufsiga - 24-ka saacadood	1800 778888 https://www.drcc.ie/services/
Khadka Kaalmada Dumarka - 24-ka saacadood	1800 341900 https://www.womensaid.ie/
Shebekadda Horumarinta Ragga	1800 816588 https://mensnetwork.ie/
Kaalmada Ragga ee Ireland	01 554 3811 https://www.mensaid.ie/



Liiska Ururada la shaqeeya dadka ku cusub Ireland

Xarunta Taageerada Soo-galootiga ee Clare (CISC)	www.clareimmigrantsupportcentre.com
Daryeel-wadaag (Crosscare) <i>(Adeega Macluumaadka iyo u Doodista Qaxoontiga)</i>	www.crosscare.ie www.livinginireland.ie limayl: refugeeservice@crosscare.ie
Doras Luimní <i>(Taageera xuquuqda dhammaan soo-galootiga ah ee ku nool Limeric iyo guud ahaan gobolka Galbeedka-Dhexe)</i>	www.dorasluimni.org
Focus Ireland <i>(Caawiya qoysaska, dhalinyarada iyo carruurta khatarta ugu jirta ama guri la'aantu ay saameysay)</i>	www.focusireland.ie
Golaha Soo-galootiga ee Ireland	www.immigrantcouncil.ie
Xarunta Caafimaadka ee Taageerta Soo-galootiga ee Degmada Kilkenny	www.frmcgrathcentre.ie/immigrant-support-clinic/
Ururka Caalamiga ah ee Soo-galootiga (IOM) <i>(Laanta ururkan ee Ireland)</i>	https://ireland.iom.int/
Golaha Qaxoontiga ee Ireland	www.irishrefugeecouncil.ie
Adeega Qaxoontiga ee Jesuit (JRS) <i>(Wuxu qaxoontiga siiyo dhowr adeeyo taageero ah)</i>	www.jrs.ie
Mayo Intercultural Action	https://www.mayo.ie/en-ie/living-in-mayo/living-services/mayo-intercultural-action
Nasc <i>(Urur ka shaqeeya xuquuqda aadanaha, caddaaladda bulsho iyo sinnaanta)</i>	www.nascireland.org
New Communities Partnership (NCP) <i>(Shebekad madaxbannaan oo heer waddan ah oo ka kooban 175 kooxood oo ay hogaamiyaan dad soo galooti ah oo ka kala socda 65 dhalasho kuwaas oo xafiisyo ku leh Gobolka Dublin iyo Gobolka Cork oo xiriir la leh magaalooyinka kale)</i>	www.newcommunities.ie limayl: info@newcommunities.ie

<p>Ruhama (Urur la shaqeeya dumarka ay saameysay dhilaysiga iyo noocyada kale ee ka ganacsiga galmada)</p>	<p>www.ruhama.ie</p>
<p>SPIRASI (Waxay la shaqeeyaan magangalyo-doonka, qaxoontiga, iyo kooxaha kale soo-galootiga ah ee dhibaataysan)</p>	<p>www.spirasi.ie</p>
<p>Tralee International Resource Centre (TIRC)</p>	<p>www.tirc.ie</p>
<p>UNHCR (Hay'adda Qaramada Midoobay u Qaabilsan Qaxoontiga)</p>	<p>www.unhcr.org/en-ie</p>
<p>Xiriirada kale ee Waxtarka leh</p>	
<p>Booliska Ireland (An Garda Síochána) (Adeegyada booliska ee waddanka Ireland)</p>	<p>https://www.garda.ie/en/contact-us/station-directory/</p>
<p>Barnardos (Urur la shaqeeya carruurta iyo qoysaska)</p>	<p>www.barnardos.ie</p>
<p>Childrens Rights Alliance (Macluumaad ku saabsan xuquuqda carruurta iyo Sharciga Ireland)</p>	<p>www.childrensrights.ie</p>
<p>Guddiyada Adeegyada Carruurta iyo Dhalinyarada (Children and Young People's Services Committees) (Macluumaadka iyo adeegyada loogu talagalay da' yarta)</p>	<p>www.cypsc.ie</p>
<p>Macluumaadka Muwaadiniinta (Macluumaad ku saabsan Xuquuqaha iyo Shuruucda Irelanda)</p>	<p>www.citizensinformation.ie</p>
<p>Guddiyada Xannaaneynta Ilmaha ee Magaalada iyo Gobolka (City and County Childcare Committees) (Waxay kaalmeyaan in boos laga helo xannaanada ilmaha ee dugsi ka hor)</p>	<p>www.myccc.ie</p>
<p>Waaxda Carruurta, Sinnaanta, Naafonimada, Is-dhexgalka iyo Dhalinyarada (Waaxda dowladda Ireland u qaabilsan masuuliyadda carruurta)</p>	<p>www.gov.ie/dcediy Taleefan: +353 1 6473000 Iimayl: contact@equality.gov.ie</p>

<p>Waaxda Ilaalinta Arrimaha Bulshada <i>(Waaxda dowladda Ireland u qaabilsan masuuliyadda dhammaan bixinta lacagaha arrimaha bulshada iyo u qalmistooda ee carruurta iyo dadka waaweynba)</i></p>	<p>www.gov.ie/en/organisation/departments/departments-of-social-protection/</p>
<p>Golaha Waxbarashada iyo Tababarada ee Ireland (ETBI) <i>(Macluumaad ku saabsan waxbarashada iyo goobaha dugsiyada)</i></p>	<p>www.etbi.ie</p>
<p>Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) Liiska Hubinta Badbaada Ilmaha ee Gargaarka Degdega ah</p>	<p>https://www.hse.ie/eng/health/child/childsafety/checklist-first-aid.pdf</p>
<p>Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) Liiska Hubinta Badbaada Ilmaha ee Loogu talagalay Waalidka oo Wata Ilmo ka ilaalin</p>	<p>https://www2.hse.ie/babies-children/child-safety/at-home/child-proof-your-home/</p>
<p>Taageerada Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) ee loogu talagalay daryeelayaasha carruurta naafada ah - Dheefaha iyo Xuquuqaha (Adeega Caafimaadka Ireland)</p>	<p>https://www2.hse.ie/services/disability-support-and-services/support-for-carers-of-children-with-a-disability/benefits-and-entitlements-for-carers-of-children-with-a-disability.html</p>
<p>Adeegyada Naafonimada Carruurta ee Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) (Adeega Caafimaadka Ireland)</p>	<p>https://www2.hse.ie/services/disability-support-and-services/childrens-disability-services/find-a-childrens-disability-service.html</p>
<p>Adeegyada iyo Taageerada Naafonimada Carruurta ee Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) (Adeega Caafimaadka Ireland)</p>	<p>https://www.hse.ie/eng/services/list/4/disability/</p>
<p>Khadka kaalmada Maandooriyaha iyo Khamrada ee Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) (Adeega Caafimaadka Ireland)</p>	<p>Taleefan bilaasha: 1800 459 459</p>
<p>Adeegyada iyo Taageerada Caafimaadka Maskaxda Carruurta ee Adeega Fulinta Caafimaadka (HSE) (Adeega Caafimaadka Ireland)</p>	<p>https://www2.hse.ie/services/mental-health/services-search/ Taleefanka: 1800 111 888</p>
<p>Waaxaha iyo Dowladda Ireland</p>	<p>www.gov.ie</p>
<p>ISPCC <i>(Waxay adeegyo kala duwan toos u siiyaan carruurta iyo qoysaska)</i></p>	<p>www.ispcc.ie</p>

<p>Golaha Kaalmada Sharciyeed (Legal Aid Board) <i>(Urur dawladu maalgeliso oo madax bannaan oo bixiya talo iyo kaalmo sharciga madaniga ah)</i></p>	<p>www.legalaidboard.ie</p>
<p>Nidaamka Xannaaneynta Carruurta ee Waddanka <i>(Macluumaad ku saabsan daryeelka ilmaha ee dugsiya ka hor)</i></p>	<p>https://www.ncs.gov.ie/en/ +353 1 906 8530 - Caalami/Codsiyada Qiimeynta Dakhliga +353 1 906 8535 - Gudbinada Kafaalada</p>
<p>Shebekadda Carruurta Waddanka<i>(Waxay taageero siiyaan qaybta carruurnimada hore)</i></p>	<p>https://ncn.ie/parents/</p>
<p>Golaha Waalidka Waddanka <i>(Khadka kaalmada iyo adeegyada Tababarada ee loogu talagalay waalidiinta ee dhammaan qaybaha waxbarashada ilmaha)</i></p>	<p>www.npc.ie</p>
<p>Khadka ilmaha <i>(Taageerada Waalidiinta)</i></p>	<p>www.parentline.ie Taleefan: +353 1 8733500</p>
<p>Kooxaha Waxbarashada iyo Luuqadda ee Gobolada (REALTs) <i>(Kaalmeynta boosaska iyo goobaha dugsiyada)</i></p>	<p>https://www.gov.ie/en/publication/48639-information-for-schools-ukraine/</p>
<p>Samaritans Ireland <i>(Hay'ad samafal Ireland deggan oo bixisa taageero maskaxeed24-kii saacadood ee maalintii, 365 maalmood ee sannadka)</i></p>	<p>https://www.samaritans.org/ireland/samaritans-ireland/</p>
<p>Tusla, Xarunta Dhexe ee Hay'adda Carruurta iyo Qoyska <i>(Hay'adda Dowladda ee ka masuulka ah carruurta iyo dhalinyarada)</i></p>	<p>Tusla, Child and Family Agency, The Brunel Building, Heuston South Quarter, Saint John's Road West, Dublin 8. D08 X01F Taleefan: +353 1 7718500 limayl: info@tusla.ie www.tusla.ie</p>
<p>Tusla, Hay'adda Carruurta iyo Qoyska Kooxaha Adeega Arrimaha Bulshada/Goobaha Xiriirka ee Loogu Talagalay</p>	<p>https://www.tusla.ie/get-in-touch/duty-social-work-teams/</p>

